


DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMALIYA



ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA

الجريدة الرسمية RASMIGA

DAWLAD A PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 37-aad. Garowe 15. 12.2017

Lam.12.

Faafintabilwalbasoobaxda جريدة الشهرية

QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh. So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh. So 170,000 dalkagudihiisa, dalkadibaddiisa Sh. So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F. Rhalkiis adariyowixii ka yar waa Sh. So 3,000, rukunka iyo qoritaankawaxaa la waydiista qeybtamaamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagubixinaya axafiiskacanshuuraha berriga ee wasaaraddamaaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Ansixinta Dib u habaynta Xeerka shatiyada ganacsiga puntland.

Qaybtalabaad

Xeer


Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

Xeer LR .9. ee 15/12/2017, kuna saabsan ansixinta Dib u habaynta Xeerka shatiyada ganacsiga puntland.



Xeerka Lr.8. ee16/12/2017, kuna saabsan ansixinta Dib u habaynta Xeerka shatiyada ganacsiga puntland.

Madaxweynuhu,

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/106/2017 Garowe, jimce. Date: 30/11/2017;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Dib u habayntani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen dib u habaynta Xeerka shatiyada ganacsiga puntland.

Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPLS.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka Xeerkan wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland, cid kastana ay waajib ku tahay inay dhawrto, kuna dhaqanto.


Prof Cabdiwelimaxamad Cali Gaas.
Madaxweynaha Dawladda Puntland.



DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 106 / 2017

Garowe, Khamiis

Date:- 30/11 /2017

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garowe

Ujeedo:- Ansixinta Dib u habaynta Xeerka Shatiyada ganacsiga Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY: Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweynaha
Ref: **MW/DPS/117/2017** ee March 09,2017 kuna saabsan soo gudbin Ansixin Xeer

MARKUU TIXELIYEEY: Baahida loo qabo Ansixinta Dib u habaynta Xeerka Shatiyada Ganacsiga Puntland.


MARKUU ARKAY: Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 40-aad fadhigii 12-aad ee 15/11/2017 Dib u habaynta Xeerka Shatiyada Ganacsiga Puntland.

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Dib u habaynta Xeerka Shatiyada Ganacsiga Puntland.


Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi



Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Xeerka Shatiyada Ganacsiga Puntland

Garowe, November/2017

Qaybta 1aad.

Magaca iyo Ujeeddada Xeerka

Qodobka 1 aad.

Magaca iyo Baaxadda Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu magacaabaa xeerka Shatiyada Ganacsiga Puntland.
2. wuxuu ku baahayaa guud ahaan dhulka Puntland.

Qodobka 2-aad

Ujeeddada Xeerka

1. wax ka badalka iyo ballaarinta xeerka shatiyada gancsiga Puntland (Law No.14) oo la ansixiyay 28/10/2000.
2. Maaraynta, ka war qabista, dhiiri gelinta iyo kor u qaadidda ganacsiga Puntland.

Qaybta 2aad

Shatiyada ganacsiga

Qodobka 3-aad

Wajibka qaadashada Shatiga

1. qof kasta oo doonaya in uu ganacsi ka furto gudaha Puntland waxaa waajib ku ah in uu qaato Shatti oggolaansho.
2. Shatiga ogolaanshaha ganacsiga ee ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadahu waa sanadle.

Qodobka 4-aad

Bixinta Shattiga ganacsiga

1. Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha Dawladda Puntland ayaa awood u leh bixinta shatiyada ganacsiga.

Qodobka 5aad

Qaybaha Shatiyada Ganacsiga

1. Shatiyada ganacsiga ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland waxay ka kooban yihiin 5 qaybood oo mid kastaa ay leedahay heerar kala duwan, khidmadaha laga qaadayana ay u kala badan tahay hadba sida ay u kala sarreeyaan sida ku cad qodobka 28-aad ee isla xeerkan.

Qaybta 3-aad

Shatiyada Ganacsiga Guud

Qodobka 6-aad

Qeexidda Shatiga Ganacsiga Guud

1. Shatiga Ganacsiga Guud (General Trade License) waa mid ka mid ah qaybaha shati (ruqso qanacsi) ee ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu kaas oo la siiyo dhamaan ganacsatada ama shirkadaha ka ganacsada badeecooyinka kala duwan ee Puntland gudeheeda.

Qodobka 7-aad

Qaybaha Shatiga Ganacsiga Guud

1. Shatiga Ganacsiga Guud wuxuu ka kooban yahay 4 heer oo kala ah A,B,C iyo D.

Qodobka 8-aad

Shatiga Ganacsiga Guud heerka A (Grade A)

1. heerka A waa heerka ugu sarreeya ama kan koowaad wuxuuna ku waajibay ganacsatada ama Shirkadaha waaweyn ee ka ganacsada badeecooyinka Jumladaha ah sida: Qalabka dhismaha, Qalabka konrontada, Sharaabka, Dharka, Raashinka, Qalabka Gaadiidka (Spare parts), Daawooyinka, Shidaalka, Bagaashka, Sibirka iyo Shirkadaha baabuurta. IWM.

Qodobka 9-aad

Shatiga Ganacsiga Guud heerka B (Grade B)

1. Heerka B waa heerka labaad ee qaybta Shatiga ee Ganacsiga Guud (General Trade License), heerkani wuxuu ku waajibay ganacsatada ama Shirkadaha badeecooyinka tafaariiqlayda ah kuwooda waawayn sida: Carwooyinka dharka iyo maacuunta, Subermarket-yada, Qalabka Gaadiidka (Spare Parts), shirkadaha qalabka konrontada, laamaha(branches) shirkadaha waaweyn ay ku leeyihiin gobolada iyo degmooyinka. Iwm.

Qodobka 10-aad

Shatiga Ganacsiga Guud heerka C (Grade C)

1. Heerka C (Grade C) waa heerka sadexaad ee qaybta Shatiga ee Ganacsiga Guud (General Trade License), heerkani wuxuu ku waajibay ganacsatada Badeecooyinka Tafaariiqlayda

dhexe oo ay ka mid yihiin. Bakhaarada raashinka, maacuunta iyo sharaabka, Makhaayadaha cuntada, shirkadaha kaluumaysiga gudaha

Qodobka 11-aad

Shatiga Ganacsiga Guud heerka D (Grade D)

1. Heerka D (Grade D) waa heerka ugu hooseeya ee qaybta Shatiyada ee Ganacsiga Guud, (General Trade License), heerkani wuxuu ku waajibay ganacsatada ama shirkadaha badeecooyinka Tafaariiqlayda yar yar sida: dukaamada, najaaradaha, iskaashatooyinka yaryar sida: Khudaarlayda, milixlayda. Makhaayadaha cuntada, bacadlayaasha.

Qaybta 4aad

Shatiyada Adeeg Bixiyayaasha (Service Providers License)

Qodobka 12-aad

Qeexidda Shatiga Adeeg bixiyayaasha

1. Shatiga Adeeg Bixiyayaasha (Service Providers License) waa mid kamid ah qaybaha shati (Ruqso Ganacsi) waxayna ka kooban tahay heerkarka A, B, C iyo D. Shatigan iyo heerkariisu waxay ku waajibeen dhamaan Shirkadaha ama ganacsatada kala duwan ee adeegyada bixiya.

Qodobka 13-aad

Shatiga Adeeg bixiyayaasha heerka A (Grade A).

1. Heerka. A (Grade A): waa mid ka mid ah heerkarka uu ka kooban yahay qaybta shati ee adeeg bixiyaha (service provider), waana heerka ugu sareeya sadexda heer oo ay ka kooban tahay qaybtani, wuxuuna ku waajibay shirkadaha adeegyada bixiya xarumohooda dhexe (Headquarters) sida: Shirkadaha isgaarsiinta, xawaaladaha lacagta, bangiyada iyo shirkadaha dhismaha ee waaweyn (construction companies).

Qodobka 14-aad

Shatiga Adeeg bixiyeyaasha heerka B

1. Heerka B (Grade B), waa heerka labaad ee qaybta shati ee adeeg bixiyaha (Service Provider), waana heerka dhexe ee qaybtan. Si gaara heerkani wuxuu ku waajibay laamaha gobollada ee shirkadaha isgaarsiinta, xawaaladaha, lacagta, bangiyada iyo Shirkadaha dhismayaasha heerka dhexe.

Qodobka 15-aad

Shatiga Adeeg bixiyeyaasha heerka C

1. Heerka C (Grade C), Waa heerka sadexaad ee qaybta shati ee adeeg bixiyaha (Service Provider). Si gaara heerkani wuxuu ku waajibay shirkadaha ama ganacsatada adeegyada bixiya sida: Shirkadaha dhismayaasha heerka hoose, shirkadaha biyaha, cusbitaalada, huteelada waawayn, shirkadaha dalxiiska, xafiiska la talinta ee heerka dhexe, Televisiinada, idaacadaha, shirkadaha gaaska (BB gaas), shirkadaha koronto galinta, sariflayaasha waaweyn iwm.

Qodobka 16-aad

Shatiga Adeeg bixiyeyaasha heerka D

1. Heerka D (Grade D) waa heerka afraad ee qayta shati ee Adeeg Bixiyayaasha (Service Providers) heerkani wuxuu ku waajibay adeeg bixiyayaasha kala ah: Hoteelada yar yar, kaalimaha shidaalka, jaamacadaha, iskuulada, machadyada, xafiisyada latalinta, garaashayada cillad-bixinta, sariflayaasha yar-yar, xafiisyada tigidhada (Tickets) gaadiidka (travel agency) iwm.

Qaybta 5aad

Shatiyada Dhoofinta iyo Soodejinta (Export & Import License)

Qodobka 17-aad

SHATIGA DHOOFINTA (EXPORT LICENSE)

Waa mid ka mid ah saddexda heer ee ay ka kooban tahay qaybta shati ee Dhoofinta iyo Soo-dejinta (Export & Import), wuxuu heerkani si khaas ah u khuseeyaa shirkadaha ama ganacsatada debeda u dhoofiya badeecooyinka laga soo saaro dalka gudihisa (Domestic Products) kuwaas oo xeerarka DPL oggolyihiin.

Qodobka 18-aad

Shatiga Soo-dejinta (Import license)

Shatiga Soo-dejinta (Import license) waa mid ka mid ah saddexda heer ee ay ka kooban tahay qaybta Shati ee Dhoofinta iyo Soo-dejinta (Export & Import), wuxuu heerkani si khaas ah u khuseeyaa shirkadaha ama ganacsatada wax soodejiya (keena dalka gudihisa) badeecooyinka laga soo saaray meel ka baxsan dalka (Foreign Products).

Qodobka 19-aad

Shatiga Dhoofinta Iyo Soo-dejinta (Export & Import)

Shatiga Dhoofinta Iyo Soo-dejinta (Export & Import) waa mid ka mid ah saddexda heer ee ay ka kooban tahay qaybta shati ee Dhoofinta iyo Soo-dejinta (Export & Import), wuxuu heerkani si khaas ah u khuseeyaa ganacsatada ama shirkadaha ka ganacsada dhammaan labada nooc ee soo-dejinta iyo dhoofinta (Both Export & Import). Waxay dhoofiyaan wax soosaarka dalka qaybihiisa kala duwan sida: wax soo saarka warshadaha dalka, dhoofinta xoolaha nool, faleenka, khudaarta, kaluunka IWM. Sidoo kale waxay soo dejiyaan badeecooyinka laga soo saaro dalka debediisa oo xeerku oggol yahay.

Qaybta 6-aad

Shatiyada Wakiillada Ganacsiga (Business Agents License).

Qodobka 20-aad

Qeexidda Shatiga Wakiillada Ganacsiga

Wakiillada Ganacsiga (business agents) waa qayb kamid ah qaybaha Shati (ruqso ganacsi) ee ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu, qaybtani waxay ka kooban tahay labo heer oo kala ah A iyo B kuwaas oo la siinayo ganacsi kasta oo wakiil ku leh gudaha Puntland.

Qodobka 21-aad

Shatiga Wakiillada Ganacsiga Heerka A

Heerka A (Grade A) waa mid ka mid ah saddexda heer ee ay ka kooban tahay qaybta Shatiga Wakiillada Ganacsiga (Business Agent License) ee ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu waana heerka ugu saraysa qaybtaan, heerkani wuxuu ku waajibay wakiillada ganacsiga sida: wakiillada shirkadaha Qaadka wakiillada shirkadaha Sigaarka IWM.

Qodobka 22-aad

Shatiga Wakiillada Ganacsiga Heerka B

Heerka B (Grade B) waa mid kamid ah sadexda heer ee ay u qaybsanto qaybta Shatiga Wakiillada Ganacsiga (Business Agent License) ee ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu waana heerka dhexe ee qaybtaan, heerkani wuxuu ku waajibay wakiillada shirkadaha ganacsiga ee debedda laga leeyahay sida: wakiillada Diyaaradaha, wakiillada Maraakiibta, wakiillada Doonyaha waawayn, wakiillada Shirkada gawaarida IWM.

Qaybta 7aad

Shatiyada Shirkadaha Caalamiga ah (International Companies).

Qodobka 23-aad

Shatiga Shirkadaha caalamiga ah Heerka A (Grade A)

Heerka A (Grade A) waa heerka ugu sarreeya qaybtan wuxuuna ku waajibay Shirkadaha Caalamiga ah kuwooda waaweyn.

Qodobka 24-aad

Shatiga Shirkadaha caalamiga ah Heerka B (Grade B)

Heerka B (Grade B) waa heerka labaad ee qaybtan wuxuuna ku waajibay Shirkadaha Caalamiga ah kuwooda yar yar.

Qaybta 8-aad

Shatiyada Warshadaha (Industries License).

Qodobka 25-aad

Qeexidda Shatiga Warshadaha (Industries License)

Shatiga Warshadaha (Industries License) waa mid ka mid ah qaybaha Shati ganacsi (ruqso ganacsi) ee ay bixiso Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu, qabytaani waxay khusaysaa Warshadaha wax soo saarka ee ka jira gudaha Puntland hadday ahaan lahaayeen kuwa debedda laga leeyahay oo maal-gashada khayraadka dalka iyo kuwa ay leeyihiin muwaadiniinta Dalka. Qaybtaani waxay u kala baxdaa saddex heer oo kala ah A, B iyo C.

Qodobka 26-aad

Shatiga Warshadaha (Industries License) Heerka A

Heerka A (Grade A) waa mid ka mid ah sadexda heer ee ay u kala baxdo qaybta Shati ee Shatiga Warshada (Industries License), waana heerka ugu sareeya ee qaybtaan. Heerkani

wuxuu ku waajibay warshadaha wax soo saar ee laga leeyahay dalka debeddiisa kuwaas oo maal-gashada deegaanada Puntland.

Qodobka 27-aad:

Shatiga Warshadaha (Industries License) Heerka B.

Heerka B (Grade B) waa mid ka mid ah saddexda heer ee ay u kala baxdo qaybta shati ee Shatiga Warshada (Industries License), heerkani wuxuu ku waajibay warshadaha wax soo saar ee laga leeyahay gudaha dalka kuwooda waawayn ayadoo la eegayo heer kooda wax soo saar.

Qodobka 28-aad

Shatiga Warshadaha (Industries License) Heerka C.

Heerka C (Grade C) waa mid ka mid ah saddexda heer ee ay u kala baxdo qaybta shati ee Shatiga Warshada (Industries License), Heerkani wuxuu ku waajibay warshadaha wax soo saar ee laga leeyahay dalka kuwooda yar yar ayadoo la eegayo heer kooda wax soo saar.

Qaybta 9-aad

Warqadaha Summadda, Diiwaanglinta, Caddaynta iyo Oggolaansha ganacsiga.

Qodobka 29-aad

Muhiimadda waraaqaha.

Dhammaan warqadahani waxay xoojinayaan shatiga ayagoo hubinaya cidda shatiga lasiinayo, shatiga ay u qalmaan, ilaalinta xuquuqda lahaanshaha, oggolaanshaha ganacsiga iyo caddaynta cidkasta oo Wasaaraddu ruqso ganacsi siiso. Sidoo kale, warqadahani waa khidmad-hoosaadka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.

Qodobka 30-aad

Warqada summadda Ganacsiga (Trade Mark Form).

Warqadani waa warqad lagu caddaynayo laguna ilaalinayo summadda ganacsi (Trade Mark/Company Sign) ee u khaaska ah shirkadda, magaca u khaaska ah shirkadda iyo badeecada ama adeegga u khaaska ah ee ay bixiso shirkaddu.

Qodobka 31-aad

Warqadda diiwaangalinta shirkadaha cusub (New Company Registration Form)

Warqadani waa warqadda lagu diiwaangeliyo shirkadaha cusub ee doonaya in ay qaataan shatiga ganacsiga, taas oo lagu xafidin doono (lagu qori doono) xogta asaasiga ah ee shirkadda sida: magaca saxda ah ee shirkadda, mulkiilaha/mulkiilayaasha shirkadda, nooca ganacsi, raasumaalka (Capital), halka ay ku taal, cidda lagala soo xiriirayo IWM.

Qodobka 32-aad

Warqadda Caddaynta Shatiga (License Declaration Form)

Warqadani waa warqad la siinayo shirkadaha ama ganacsatada qaata shatiga ganacsiga taas oo Wasaaradda Ganacsigu ay ku caddaynayso in shirkadda ama ganacsaduhu uu ka haysto shati ganacsi Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha isla markaana uu si sharci ah ku ganacsan karo.

Qodobka 33-aad

Warqada Oggolaanshaha Ganacsiga (Business Permit Form)

Waa warqad loogu oggolaanayo ganacsatada debedda iyo kuwa gudahaba inay ku ganacsan karaan ama maal-gashan karaan dalka, kadib marka la hubiyo dhamaystirka

dhammaan shuruudaha ay xeerarku ku xireen oggolaanshaha ganacsiga iyo maalgashiga dalka.

Qaybta 10aad

Khidmaha iyo Dakhliga diiwaangelinta.

Qodobka 34-aad

Khidmadaha

1. Laysamada Ganacsiga guud (General Trade License).

✓ Heerka Ganacsi ee Grade A waa.	<u>\$350</u>
✓ Heerka Ganacsi ee Grade B waa.	<u>\$250</u>
✓ Heerka Ganacsi ee Grade C waa.	<u>\$137</u>
✓ Heerka Ganacsi ee Grade D waa.	<u>\$86</u>

2. Laysamada Shirkadaha Adeegga bixiya (Service Provider License).

✓ Adeeg Bixiye (Service Provider) Grade A.	<u>\$ 661</u>
✓ Adeeg Bixiye (Service Provider) Grade B.	<u>\$ 345</u>
✓ Adeeg Bixiye (Service Provider) Grade C.	<u>\$ 249</u>
✓ Adeeg Bixiye (Service Provider) Grade D.	<u>\$ 90</u>

3. Laysamada Dhoofinta iyo Soo-jejinta (Export & Import).

✓ Heerka Ganacsi ee Dhoofinta iyo soo-dejinta (Export & Import): waa.	\$512
✓ Heerka Ganacsi ee soo-dejinta (Import only) waa.	<u>\$345</u>
✓ Heerka Ganacsi ee Dhoofinta (Export only) waa.	\$150

Qaybta 11-aadQodobo kala DuwanQodobka 36-aadFulinta Xeerkan.

1. Fulinta xeerkani waa in loo hirgeliyo ku dhaqankiisa si dhab ah, isla markaana ay ka qayb qaadato hirgalintiisa cid kasta oo door ku leh.
2. Waxaa fulinta xeerkaaan laga doonayaa dhammaan hay'adaha dowladda gaar ahaan kuwa Sharci fulinta, khaas ahaan waxaa iska kaashanaya Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasaaradda maaliyadda iyo ciidanka ilaalinta canshuuraha.
3. Hay'adaha dawladda, kuwa caalimiga ah iyo hay'adaha wadaniga ahi ma siin karaan qandaraas xiriir ganacsina lama samayn karaan Shirkad ama ganacsade aan haysan Shatiga ganacsiga ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha DPL.
4. Shaqaalaha Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu waxay ka hawl gelayaan dhammaan kastamada Puntland waxayna ilaalinayaan Shatiyada Ganacsiga, tirada iyo tayada badeecadaha dalka soo galaya iyo kuwa ka baxaya.
5. Shaqaalaha Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaduhu sidoo kale waxay ka hawl-gelayaan dhammaan degmooyinka iyo gobollada Puntland ayagoo u xilsaaran bixinta iyo hubinta Shatiyada ganacsiga.

Qaodobka 37-aadKu Xadgudubka Xeerka.

1. Ku xad gudbidda Xeerkaani waa ayadoo aan la fulin gabi ahaantiisaba ama la jebiyo qaar ka mid ah qodobada xeerka, arimahaas oo ciddii lagu helaa ay mutaysandoonto ciqaabteeda.

2. Ganacsaduhu ma sameysan karo Shirkad ama meherad Ganacsi, waxna ma dhoofin karo mana soodejin karo, wakiilna ma geli karo, warshad ganacsina ma samaynsan karo hadii uusan oggolaansho ka haysan Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha DPL.
3. Ganacsadihi ku xad-gudba xeerkaan wuxuu mutaysanyaa in laga qaado Shattigii uu horay ulahaa iyo ganaax le'eg qiimaha shatigiisa, markaa kadib ayuu codsan karaa shati cusub.

Qodobka 38-aad


Burin

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor-imaanya ama la socon Karin Xeerkan

Qodobka 39-aad

Dhaqangalka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Golaha Wakiilada Puntland, Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.


Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland

